

## **XUKUUMADDA SOOMAALIYA**

### **GOLAHA XEER-DEJINTA QARANKA**

**Golaha Xeer-dejinta Qaranka fadhigiisa 27-8-1960 wuxuu meelmariyay ku-darisyada iyo wax ka baddallada Xeer nidaamiyahiisa gudaha (oo lagu baahiyay Faafinta Rasmiga, suppt. lamba. 2 illaa lamba. 12 taariikhda 20 Disember 1959).**

---

#### **KU-DARISYADA IYO WAX KA BADDALLADA**

##### **Qod. 11. biis**

Guddiyada baarlamaanka ee ku xusan qiod. 60 lamba. 3 ee Dastuurka waa kuwa joogto ah iyo gaara. Guddiyada baarlamaanka waxaa la dhisayaa bilowga hawlaha xeer-dejinta waxyna xilkaas sii haynayaan inta ay hawshaas hayaan.

Guddiyada gaarka waxaa la dhisayaa kolba marka loo baahdo daraasadda mowduucyo cayiman. Waxaa kuwa joogto ah Guddiyada, Arrimaha Gudaha, Arrimaha Dibadda iyo Warfaafinta, Garsoorka, Diffaaca, Maaliyadda, Arrimaha Dhaqaalaha (Warshadah iyo Ganacsiga, Hawlaha Guud iyo Isgaarsiinta, Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha, Arrimaha Bulshada (Caafimaadka Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada – Arrimaha Guud, Waxbarashada). Dhismaha Guddiyada waxaa oggolaanaya Golaha Xeer-dejinta oo xubnihiisa soo magacaabaya

##### **Qod. 12. Biis**

Saddex cisho gudahood marka uu dhaco fadhiga koobaad Guddoomiyaha wuxuu isku mar ku baaqayaa in ay isku yimadaan iyagoo kala gaara kooxaha baarlamaanka si ay u magacaabaan wakiiladooda joogtada ah iyo Guddiyaga joogtada aha ee ku xusan qodobka sare. Koox kasta waxay u soo magacaabayaan wakiiladooda Guddi kasta iyado lagu saleeynayo halkii wakiilba siddeedi Xildhibaanba ama tira jajab ka yar siddeed Sina hal Xildhibaan looma magacaabi karo Guddi joogto ah hal mar wax ka badan haddii aanu ka mid ahayn koox ka kooban lambar ka yar Guddiyada joogtada ah. Guddoomiaha ayaa u diraya Guddi kasta dadka loo qoondeeyay.

Guddoomiyaha marka ay soo gaarto qoondaynta wuxuu ku tallaabsanayaa in uu dhiso Guddiyada, kuwaaso laga ansixinayo Golaha Xeer-dejinta. Baddalka xubnaha Guddiyada joogtada sabab kasta ha ku maqnaadaane waxaa samaynaya kooxda baarlamaanka uu Xildhibaan ka baddalayo ka mid ahaa. Wixii wax ka baddala ee tirada ay kooxuhu ka koobanyihiin wax saamayn ah kuma yeelanayaan qoondaynta uu Guddiga joogtada ka koobanyahay.

Marka koox Xildhibaan ah oo ka wada tirsan isla Guddi ay ka codsadaan Guddoonka in laga baddalo Guddiga ay ka tirsanyihiin midba markiisa, Guddoonka kooxda haddi uu ku raaco wuxuu wargalinayaa Guddoomiyaha Golaha Xeer-dejinta kaasoo wargalinaya isbaddalka dhacay Guddoonka Guddiga uu mid walba ka tirsanyahay; hasayeesho Xildhibaan ka baddalka sameeyay mar labaad ma samayn karo inta ay socoto xeer-dejintaas.

##### **Qod.13**

Golaha joogtada ee Guddi kasta ee joogto ah waxay ka kobnaanayaan 11 xubin kuwaaso iska dhex dooranaya Guddoomiyahooda, Guddoomiy Ku-xigeen iyo Xoghaye.

### **Qod. 15**

Hindise sharciyeedyada waxaa loo dirayaa Guddiyada joogtada in ay soo darsaan iyadoo la eegayo kolba qaabka awoodda ay u soo tilmaantay Wasaradda soo jeedisay, marka uu maqanyahay Guddoomiyaha Golaha Xeer-dejinta.

Hindise sharciyeedyada keenaya dakhli ama kharsh waxaa loo qaybinaya islamarkiiba xitaa Guddiga Maaliyadda.

### **Qod. 16**

Daraasadda miisaaniyadd ku-talagalka iyo xisaabaadka dhammaadka, waxaa sgooni ah iska leh Guddiga Maaliyadda oo lagu biiriyo wakiil ka socda saddex Guddi ee joogtada ah.

### **Qod. 21**

Guddomiyeyaasha Guddiyada Joogtada ah marka ay soo gaaraan hindise sharciyeedyada la rabo in Guddiyadooda ay darsaan waxay ka dhex magacaabayaan Guddiga xiriiriye. Marka hindise sharciyeedka uu keenayo culaab maaliyadeed waxaa lagama maarmaana in Guddiga shaqada ku leh maadi ahaan lagu biiriyo wakiil ka mida Guddiga Maaliyadda. Marka Guddiga shaqada ku leh aanu qaadan talada wakiilka Guddiga Maaliyadda, isaguna uu ku adkaysto, waxaa la isla aadayaa Guddoomiyaha Golaha Xeer-dejinta, iyadoo Guddiguna u kulansanyahay, si ay u darsaan qodobka ku saabsan natiijada maaliyadeed, amse waxaa loo wareejinayaa darasadda Golaha Xeer-dejinta hindise sharciyeedka oo idil.

Isla xeerkaas waxaa lagu dabbaqayaa xitaa haddi ay jirto xaalad kale oo hal Guddiga loogu yeeray in ay ka soo tala bixiyaan Guddiga kale, si ay u cadeeyayaan iqtisaaskooda. Xaalad kasta ee hindise sharciyeed waxaa dib loogu soo celinayaa Golaha Xeer-dejinta, haddii Madaxweynaha Jamhuuriyadda ama toban meelood meel Xildhibaanada ama shan meelood meel Guddiyada ay dalbadaan.